



Federal Republic of Somalia
Office of the President

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYEED
MEELMARINTA HESHIISKA CAALAMIGA EE XUQUUQDA CARUURTA

SHARCI Lr. 03

Taariikh: 31/12/2014

Markuu Arkay: Qodobka 82aad, Farqadda 2aad Dastuurka KMG ee J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Xarfaha 'F' iyo 'Q' ee Dastuurka KMG ee J.F.S
Qodobkaasi sharci ahaan awood u siinaayo Madaxwaynaha
J.F.S inuu saxiixo Heshiisyada Caalamiga ah ee Dowladda
Qeyb ka tahay

Markuu Arkay: Warqadda Guddoonka Golaha Shacabka Lr. 555/3/1/14
ee soo baxday 13/12/2014 ee ku saabsan Qaraarka Golaha Shacabka lagu ansixiyey
Heshiiska UN-ka ee Xuquuqda Caruurta ee soo baxay 20/11/1989 kaas oo
Dhaqangalay 02/09/1990

Markii Tixgeliyay: Inay jirto in loo qabo baahi weyn in la badbaadiyo lana daryeelo
Caruurta Soomaaliyeed meel kasto oo ay ku sugan yahiin

WAXA UUU SOO SAARAY SHARCIGAN:

Qodobka 1aad

Waxa uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed halkaan ku oggolaaday isla markaasina
caddaynayaa in Heshiiska Caalamiga ee Xuquuqda Caruurta inuu ka mid noqday Shuruucda Dalka laga
billaabo taariikhda uu Madaxwaynaha saxiixo Sharcigaan iyada oo loo gudbinayo Xafiiska Xoghayaha Guud
ee Qaramada Midooway in laga diiwaangeliyo.

Qodobka 2aad

Waxaa halkaan ku lifaaqan labo nuqul oo Heshiiskaan ah oo ku qoran Af Soomaali iyo Ingiriis haddii loo
baahdo fasiraad waxaa loo noqonayaa nuqulka Afka Ingiriisiga.

Qodobka 3aad


Waxay Dowladda Federaalka Soomaaliyeed ka gaabsatay isla markaana aysan aqoonsanayn Qodobada 14
,20 iyo 21 ee Heshiiska kor ku xusan iyo qodobo kasto oo ka hor imaanaayo Mabaadiida Guud ee Shareecada
Islaamka

Qodobka 4aad

Waxa uu Sharcigaan dhaqangelayaa maalinta uu Madaxwaynaha saxiixo waxaana lagu soo daabacaya
Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

Muqdisho: 31/12/2014

Madaxwaynaha J.F.S
Mudane Xasan Sheekh Maxamuud





Ref: 5573/1/9/14: الرقم

Mogadishu, 31st December 2014 التاريخ

- Ku: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Muqdisho.
- Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya Muqdisho.
- Ku: Garyaqaanka Guud ee Dawladda Muqdisho.
- Og: Wasaaradda Horumarinta Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka Muqdisho.
- Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka L/H. Golaha Shacabka
- Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda L/H. Golaha Shacabka

Ujeedo: Soo Gudbin Ansixinta Heshiiska Xuquuqda Caruurta oo uu aqbalay Golaha Guud ee Qaramaha Midoobay 20^{kii} Nofeembar 1989.

M.ne Madaxweyne,

Waxaan kuugu wargelinayaa inuu Golaha Shacabka Federaalka ee Jamhuuriyadda Soomaaliya go'aan ka gaaray Ansixinta Heshiiska Xuquuqda Caruurta oo uu aqbalay Golaha Guud ee Qaramaha Midoobay 20^{kii} Nofeembar 1989 oo halkan ku lifaaqan, wuxuu Golaha Shacabka fadhigiisa 16aad ee Kalfadhiga 5aad ee 13^{kii} Diseembar, 2014 oo ka dhacay xaruntiisa Caasimadda Jamhuuriyadda Muqdisho ku ansixiyey cod furan oo dhacay sidan hoos ku xusan:

- Xildhibaan Ogolaadeen: 140 (Boqol iyo Affartan)
- Xildhibaan Diidey: 0 (Ebar)
- Xildhibaan ka aamusay: 1 (hal)

Fiiro Gaar ah: M.ne Madaxweyne, waxaan kula socodsiineynaa inay Golaha Shacabka sidoo kale heshiiskan ka soo saareen Qaraar uu ku ansixiyey Heshiiskani guud ahaan intiisa aan ka hor imaaneyn mabaa'diida guud ee Shareecada Islaamka, wuxuuse ka gowsreebtay oo ansixintan ka baxsan (taxafud) Qodobada 14^{aad}, 20^{aad} iyo 21^{aad} ee Heshiiska kor ku xusan.

Tell: +252 612224441/ +252 616312787

E-mail: speaker@parliament.gov.so

Website: www.parliament.gov.so

Habbada, M.ne Madaxweyne, waxaan si waafqsan Qodobka 90aad xarafka (q) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer-Madaxweyne, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Dawladda si waafaqsan Qodobada 84aad iyo 85aad ee Dastuurka.

Anigoo huba in waajibkaaga Datuuriga ah aad ka gudan doonto, waxaad magaca Golaha Shacabka nooga guddoontaa salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaar"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka.




MJ/AM

ANSIXINTA HESHIIS KU SAABSAN XUQUUQDA CARUURTA

Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS


Tirada Xubnaha Codeysay 141: Oggol (140). Diidmo (0). ka aamustay (1).



Saxiix: M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"

Taariikh: 31st December 2014


Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Baarlamaanka JFS



Saxiix: M. ne Jeylaani Nuur likar

Taariikh: 31st December 2014

Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Baarlamaanka JFS



Saxiix: M. ne Mahad Cabdalla Cawad

Taariikh: 31st December 2014





Ref: GSH/378/10/14

Date: 22/10/2014

Ku: Dhammaan Xildhibaanada Baarlamaanka.
=Muqdisho=

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
=Muqdisho=

Ujeeddo: Soo Gudbin Hindise Sharciyeed yo iyo Heshiisyo.

Mudanayaal,

Waxaan si xushmad iyo qadarin leh idinkugu soo gudbinaynaa Hindise Sharciyeedyada iyo Heshiisyadda hoos ku qoran oo inaga soo gaaray Xukuumadda.

1. Xisaabka xirka sanadka 20/10/ 2013 (Guddiga Maaliyadda ee Baarlamaanka)
2. Xeerka Isgaarsiinta Qaranka 15/06/2014
3. Hindise Sharciyeedka Liisamada Ganacsiga iyo Warshadaha 31/07/2013
4. Hindise Sharciyeedka Magacyada iyo Summadaha Ganacsiga 31/07/2013
5. Hindise Sharciyeedka Dib-u-eegid Sharcigii Jan 1989 ee lagu dhisay Hay'adda Duulista Rayidka iyo Saadaasha Hawada 25/06/2013
6. Hindise Sharciyeedka Xeerka La Dagaallanka Argagixisda 14/07/2014
7. Dib-u-Eegid Hindise Sharciyeedka libka Qaranka 22/06/2014
8. Heshiis ku Saabsan Xuquuqda Carruurta oo uu aqbalay Golaha Guud ee Qarammada Midoobay 20kii Nofembar 1989. 13/10/2014

Sidaasi awgeed, waxaan ku raja weynahay in aad ka gudataan wajibaadkiina Dastuuriga ah.

MAHADSANIDIIN.



Xil. Mahad Cabdalla Cawad
Guddoomiye K/Xigeenka 2-aad Ee Golaha Shacabka



(The Government of Federal Republic of Somalia)
Office of the Prime Minister

Summad: XRW/GB/000/27/09/2014

Taariikh: 25/09/2014

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka

Og: Madaxweynaha JFS

=Muqdisho=

=Muqdisho=

Ujeeddo: Soo Gudbin 'Heshiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Caruurta 1989'

Mudane Guddoomiye,

Iyadoo laga ambaqaadayo go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.00.53.09.14 ee 25/09/2014, kuna saabsanaa ansixinta 'Heshiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Caruurta 1989' oo uu Golaha Wasiirradu cod buuxa ku ansixiyey.

Waxaan, Mudane Guddoomiye, halkan idinkugu soo gudbinaynaa 'Heshiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Caruurta 1989' si aad uga gudataan waajibaadkiina Dastuuriga ah.

Sidaas darteed, waxaan idinka codsanaynaa in aad fududeysaan meel-marsiinta Heshiiskan maadaama baahi weyn loo qabo dhaqan-gelintiisa.

Naga guddooma salaam diirran.

Dr. Cabdiweli Sh. Axmed Maxamed

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS



② Mahad & Buux -
waa markii ugu
horeysay "Convention"
heerkan an Golaha
galaayo.
Ma habboon tahay
maan hol
madlin presul
loo sameeyo
guddiyada
arrinkaan
guarahaan
u samee
13/10/14

+252-61-708 7997 +252-61-655 1133 +252-61-911 1122 | email: afaraha@pmr.gov.so | Mogadishu, Somalia

BARLAMAANKA FEDERAALKA SOMALIYA XAFIISKA GUDDOOMIYAH GELID / RECEIVED TAR: 13/10/2014 TIX: 355 SIXIX: [Signature]



Jamhuuriyadda Federaalka soomaaliya
Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka
Xafiiska wasiirka

Ref: WCD/XW/000265/14

25 Sept. 2014

Ku: Golaha Wasiiradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed

= Muqdisho=

UJEEDDO: ANSIXIN HESHIISKA QARAMADA MIDOOBAY EE XUQUUQDA
CARUURTA

Mudaneyaal iyo Marwooyin;

Sida la wada ogyahay Golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobaya ayaa si wadajir ah u meel mariyey Heshiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Caruurta taariikhdu markii ay ahayd November 20, 1989. Si uu heshiiskaas u dhaqan-galo waxaa loo baahnaa in ay qalinka ku duugaan ugu yaraan 20 Waddan. Bishii Sitembar 7dii 1990 ayuu waddankii 20aad saxiixay; taas oo ka dhigtay Heshiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Caruurta mid dhaqan-gal ah.

Wixii intaas ka dambeeyay kolba dal baa ansixinayey. Inkastoo Soomaaliya ay saxiixday bishii May 9dii 2002dii, haddana Soomaaliya waxaa lagu tiriyaa wadamada tirada yar ee aan weli ansixinin maadaama aan la horgeyn Golaha Shacabka Soomaaliyeed.

Haddaba,

- **Iyada oo la raacayo tilmaanta Madaxweynaha JFS Mudane Xasan Sheekh Maxamuud** ee uu bishii November 20kii 2013 ku baaqay in la gaaray goortii ay Soomaaliya u soo jeesan lahayd ilaalinta xuquuqda caruurta oo ay diyaar u tahay dhaqan-galinta Heshiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Caruurta.
- **Iyadoo ay Soomaaliya ka dhalatay Dowlad buuxda,** waxaa waajib Qaran ah ilaalinta Xuquuqda Caruurta sida ku cad Heshiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Caruurta ee November 20, 1989.
- **Si ay Soomaaliya cod ugu yeelato doodaha looga hadlayo ilaalinta Xuquuqda Caruurta,**

Waxaan halkan idinkugu soo lifaaqay Heshiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Caruurta, waxaana ka codsanayaa Golaha Sharafta leh in uu ansixiyo si loogu gudbiyo Golaha Shacabka.

Mahadsanidiin

Md. Xildh. Faarax Sheekh Cabdulqaadir
Wasiirka Wasaaradda



Tix: GSH/13/14
Kalfadhiga: 5aad
Kulankiisa: 16aad

QARAAR GOLAHA SHACABKA

13^{ka} Diseembar 2014



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

QARAAR GOLAHA SHACABKA

KU ANSIXIYEEY HESHIISKA QARAMAHA MIDOOBAY EE
KU SAABSAN XUQUUQDA CARUURTA
UGUNA FASAXAY XUKUUMADDA FEDERAALKA
SOOMAALIYA IN AY SAXIIXDO

Mogadishu, 13^{ka} Diseembar 2014



GOLAHA SHACABKA:

Markuu arkay: Heshiiska Xuquuqda Caruurta lambarkiisuna yahay 44/25 ee Qaramaha Midoobay ansixiyey 20^{kii} Nofeembar 1989 oo dhaqangal noqday 2^{dii} Seteembar 1990;

Asaga oo Xog ogaal u ah: in Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay had walba dhiirigelinayso kana go'an tahay xaqiijinta Xuquuqda Aadanaha oo dadka dhan xaqqa u leeyahay;

Markuu Arkay: in Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya leedahay ku talagal hormarin lagu sugayo wanaajinta iyo sare u qaadidda tayada nolasha iyo daryeelka Caafimaadka Caruurta iyo qoyska;

Asaga oo Maanka ku haya: in dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya yahay dal Islaam ah una hoggaansan Shareecada Islaamka oo ka mid ah ilaha laga soo xigto sharcidejinta.

Asagoo ku kulansan: Kalfadhiga 5aad Kulankiisa 16aad ee 13^{kii} Diseembar 2014, wuxuu ansixiyey Heshiiska Xuquuqda Caruurta ee Qaramaha Midoobay guud ahaan intiisa aan ka hor imaneynin mabaadii'da guud ee Shareecada Islaamka, wuxuuse gaar ahaan ka gowsreebtay oo ansixintan ka baxsan (*taxafud*) Qodobada 14aad, 20aad iyo 21aad ee Heshiiska kor ku xusan.

Saa daraadeed: Golaha Shacabka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu Xukuumadda Federaalka Soomaaliya u fasaxay saxiixidda iyo meelmarinta Heshiikan kor ku xusan.

